# FAAFINTA RASMIGA

# الجريدة الرسمية

**_DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND SOOMAALIYA_**

لولاية أرض بونت الصومال

Sannadka 3 aad Garoowe, 28 Feebaraayo 2001 **Lam. 2**

**FAAFINTA BILWALBA KA SOO BAXDA** جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee **Madaxtooyada** Dawlad Goboleedka Puntaland

---

Qiimaha : waa Sh.So- 10.000 lambar walba.**Rukunka** Sannadkii waa Sh.So.-170.000 dalaka gudihiisa,dibaddana waa Sh.So.500.000-**Rukunka** la waydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilowdaa 1da janaayo. Qiimaha qoritaanka F.R. halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So. 3.000 Rukunka iyo Qoritaanka waxaa la waydiistaa Qaybta Maamulka Faafinta Rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda.


---

**<u>TUSMADA</u>**

**<u>Qaybta Koowaad</u>**

**<u>Sharci</u>**

Waxba Ma leh.

**<u>Qaybta Labaad</u>**

<u>Xeer</u>


- **<u>Xeer Lam.</u>** 1 ee **26/02/2001**, (Garoowe) kuna saabsan Xeerka Nulla Ostada, Diiwaan galinta heshiisyada iyo Konturaadaha ................................................ **Bogga. 1 – 5**


**<u>Qayta Saddexaad</u>**

Talooyin , Isgaarsiin, Ogaysiis IWM.

**Waxba ma leh.**

**<u>Saxid Taariikh Qaanuun</u>**
**<u>(Correggendum).</u>**

*Qaanun Lr. 12 bis ee Taariikh 13 decembar 2000, wuxuu sax ku yahay Qaanuun Lr. 12 bis ee 17 December 2000*

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**

*XAFIISKA MADAXWEYNAHA*

**PUNTLAND STATE OF**
**SOMALIA**

*OFFICE OF THE PRESIDENT*

---

XEER Lam 1 ee 26/02/2001 Garoowe, Febraayo 26, 2001
Kuna saabsan xeer Wasaaradda Maaliyedda

**MADAXWEYNAHA DAWLADDA PUNTLAND,**

**MARKUU ARKAY** Axdiga Dawladda qodabadiisa 6/12, 12.5 (xarafkiisa XV) iyo 32,

**MARKUU ARKAY** Sharciga canshuuraha dakhliga Soomaaliya ee Lam 5 ee 1965[kii],

**MARKUU XAQIIQSADAY** Baahida loo qabo dhawrista nidaamka iyo shuruucda canshuuraha,

**MARKUU TIXGELIYEY** Soo jeedinta Wasiirka Maaliyedda,

**WUXUU SOO SAARAY:**

Xeerkan soo socda:

**QODOBKA 1[AAD]**

Xeerkan Nulla Ostada, diiwaangelinta heshiisyada iyo konturaadaha waa Xeer Madaxweyne.

**QODOBKA 2[AAD]**

Saddex nuqul oo xeerkan ka mid ah ee Madaxweynuhu saxiixay iyo lifaaqiisa waxaa loo qaadanayaa asal (Original), waxaana lagu kala kaydinayaa Xafiiska Xoghaynta Madaxtooyada 1 nuqul, Xafiiska Garyaqaanka Guud 1 nuqul iyo Xafiiska Xoghayaha Golaha Wakiillada 1 nuqul.

**QODOBKA 3[AAD]**

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa ku soo bixidda Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuuna xeerkan ka mid noqonayaa xeerarka dalka, cid kasta ama Hay'ad kastana waxaa ku waajib ah in ay dhawraan kuna dhaqmaan.

Cabdullaahi Yuusuf Axmed
Madaxweynaha Dawladda

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND
EE SOMALIA
GAROOWE
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

# DOWLAD PUNTLAND, SOOMAALIYA

## MADAXWEYNAHA

| | |
|---|---|
| Markuu arkay | Qodobka 32 iyo qodobka 6/12 ee axdiga Dawlad Goboleedka Puntland; |
| Markuu arkay | Sharciga canshuuraha dakhliga ee Soomaalia dakhliga ee Lam. 5 ee 1965; |
| Isagoo tixgeliyay | Baahida loo qabo dhawrista nidaamka iyo shuruucda canshuuraha; |
| Isagoo-tixgeliyay | Soo jeedinta Wasaaradda Maaliyadda; |

## WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN

### Qodobka 1aad
### Nulla Osta (da)

Laga bilaabo Ida Janaayo 2001 madaxda shirkadaha, ganacsatada, hantiilayaasha iyo la taliyeyaasha (Consultants) doonaya in ay dalka ka dhoofaan ama ka qayb-qaataan tenderada dalka waxa looga baahan yahay in ay ka haystaan xafiiska cashuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda qiraal "Nulla Osta" qeexeysa in aan wax cashuur lagu lahayn.

## QODOBKA 2aad
( Dabeecadda Documentiga)

Nulla Osta (du) waxay leedahay dabeecad dokumenti rasmi ah. Waxayna lifaaq rasmi ah u tahay Baasabooradda lagu dhoofo iyo dokumentiga tenderada loogaga qeyb galo. Nulla Osta (du) Waxay khuseysaa oo kali ah shirkadaha, ganacsatada, hantiilayaasha iyo la taliyayaasha iwm. Dokumeentigaas la'aanteed xubnaha ay quseyso kama dhoofi karaan ayraboorada iyo marsooyinka Puntland, kamana qeyb qaadan karaan tenderada dalka laga bixiyo cid kastaa ha maal gelinayso e.

## QODOBKA 3aad
(Qaabka Helitaanka)

Nulla Osta (da) waxa laga qaadanayaa dhoofitaanka ama ka qeyb galka tenderada ka hor, xafiiska cashuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda iyada oo lagu codsanayo foomka loogu tala galay. Nulla Ostada waxa lagu lifaaqayaa baasaboorka lagu dhoofayo iyo documentiga tenderadda looga qay-qaadanayo, kuwaas oo la'aanteed aan ansaxayn.

## QODOBKA 4aad
(Fulinta)

Fulinta xeerkaan waxa u xil-saaran qaybta socdaalka, ciidanka ilaalada cashuuraha ee Booliska Puntland iyo waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda.

## QODOBKA 5aad
(Faafinta)

Xeerkaan waxa lagu faafinayaa Boletiinka rasmiga ah ee Dawladda Puntland, Soomaaliya iyo wargeysyada xorta ah

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIA
GAROOWE
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

Madax weynaha
Dowlad Goboleedka Puntland
Md. Cabdulaahi Yuusuf Axmed.

# DOWLADDA PUNTLAND, SOOMAALIYA

## MADAXWEYNAHA

| | |
|---|---|
| Markuu arkay | Qodobka 32 iyo 6/12 ee axdiga Dawladda Goboleedka Puntland; |
| Markuu arkay | Sharciga canshuuraha dakhliga Lam. 5 ee 1965 iyo sharciga diiwaan gelinta Lam. 4 ee 1981;: |
| Isagoo tixgeliyay | Baahida loo qabo dhowrista nidaamka iyo shuruucda cashuuraha |
| Isagoo dhageystay | Soo jeedinta Wasaaradda Maaliyadda; |

## WUXUU SOO SAARAY XEERKAAN

### QODOBKA Iaad
### (Diiwaan Gelinta Heshiisyada iyo Konturaadaha)

laga bilaabo 1da Janaayo 2001 heshiis kasta oo dhexmara shakhsiyaad, shirkado ama shakhsiyaad iyo shirkado ama shakhsiyaad iyo hay'ado ama shirkado iyo hay'ado (Dawli, Caalami, Samafal. iwm) ee la xirrira kala gadashada hantida maguurtada ah, tan isticmaalka dheer leh (sida Baabuurta iwm), xaashiyaha lacagta (financial dokuments) iyo heshiisyada la xiriira kontoraadaha hawl-fulinta, saad siinta (procurement) iwm, waxa laga diiwaan-gelinayaa Waaxda Cashuuraha Berriga ee Wasaarada Maaliyadda .

QODOBKA 2aad

(Diiwaan-Gelinta Shirkadaha iyo Ururadda)

Laga bilaabo 1da Janaayo 2001, waxa laga diiwaan gelinayaa xafiiska cashuuraha barriga ee Wasaaradda Maaliyadda heshiis kasta oo la xiriira dhisme shirkado, iskaashatooyin iyo ururo samafal ee laga samaynayo Puntalnd. Sidaas oo kale waxa la amrayaa in ay deg-deg isu diiwaan geliyaan shirkadaha, iskaashatooyinka iyo ururada samafalka ee ka jira Puntland oo aan hore isaga diiwaan-gelin xafiiska cashuuraha berriga ee Wasaaradda Maaliyadda

QODOBKA 3aad

(Fulinta)

Fulinta xeerkaan waxa u xil-saaran waaxda dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda iyo ciidanka ilaalada cashuuraha iyaga oo isla markaasna si joogta u kormeeri doona kana soo warbixin doona habsami u fulinta xeerkaan.

QODOBKA 4aad

(Talaabo Sharci)

Iyada oo laga shidaal qaadanayo natiijada ka soo baxda war bixinta ku xusan Qodobka 3aad ee xeerkaan waxa, laga bilaabo 1da Maarso 2001 ku takri falayaasha xeerka diiwaan-gelinta, laga qaadi doonaa talaabo sharci ah.

QODOBKA 5aad

(Faafin)

Xeerkaan waxa lagu faafinaya Boletiinka rasmiga ah ee Dowladda Puntland, Soomaaliya iyo wargeysyada xorta ah.

DAWLAD GOBOLEEDKA PUNTLAND EE SOMALIA
GAROOWE
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

Madax weynaha
Dowlad Goboleedka Puntland
Md. Cabdulaahi Yuusuf Axmed.